



qor Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, xaq waxaan ahani kama soo baxaane

Cabdullaahi Binu Camar Allah ka raali ahaade wuxuu yiri: Waxaan qori jiray wax kasta aan ka Rasuulka ka maqlo scw anoo raba inaan xifdiyo, waxaa iidiiday arinkaa quraysh, waxayna i dheheen: ma waxaad Rasuulka ka qoraysaa wax kasta oo aad ka maqasho, Rasuulkuna scw waa bashar oo caro iyo caro la'aanba wuu hadlayaa?, waan joojiyey qoraalkii, waxaan u sheegay Rasuulka scw, wuxuu afka ku fiqay fartiisa, wuxuuna yiri: "qor Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, xaq waxaan ahani kama soo baxaane."

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud.]

Cabdullaahi Binu Camar wuxuu yiri: Allaha ka raali ahaade waxaan ka qori jiray Rasuulka scw wax kastoon ka maqlo, si aan qoraalka ugu xifdiyo, rag quraysh ka mida ayaa iidiiday, waxay idheheen: Rasuulku waa bashar oo wuu hadlayaa isago caraysan ama faraxsan wuuna gafi karaa ee ka jooji qoraalka. Nabiga scw ayaan u sheegay waxay igu dheheen ragaasi, wuxuuna ku ishaaray fartiisa Nabigu scw afkiisa, wuxuuna yiri: qor, Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee waxan xaq ahayni kama soo boxo xaalad walbee, caro iyo caro la'aanba. Ilaahay sareeye wuxuu ka yiri Nabigiisa scw: "Nabigu hawadiisa kama hadlo * ee wuxuu ku hadlaa waxyi loo wax yooday" [suurada anajm 3-4].

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65077>

